Rugta Kansarka Sambabada ee One-Stop (One-Stop Lung Cancer Clinic)

Warqada Macluumaadka Bukaanka

Rugta Kansarka Sambabada ee One-Stop waxay adiga iyo kuwa kuugu dhow ku siineysaa fursad, oo ay weheliyaan takhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha lugta ku leh daryeelkaaga, inay kuu tixgaliyaan nooca daawaynta ee adiga kuugu habboon.

Go'aannada ku saabsan daaweyntaada

Badanaa, qofka laga helo kansarka sanbabada midaasoo oo lagu daweyn karo siyaabo kala duwan.

Tusaale ahaan, kansarka sanbabada waxaa mararka qaarkood lagu daweyn karaa:

- Qalliin si looga saaro kansarka, ama;
- Daawaynta shucaaca oo adeegsata fallaadho shucaac ah oo sambabada lagu hago si loo burburiyo kansarka

Waxa kale oo badanaa dhacda in daawaynta midkoodabda aanu aad uga wanaagsanayn daawaynta kale. Markaa, waa muhiim in kooxdaada caafimaadku ay kaa caawiyaan inaad fahamto daawaynta kala duwan iyo faa'iidooyinka iyo khasaarooyinka kala duwan ee daaweyn kasta.

Aad bay muhiim u tahay in la yiraahdo, marka kansarka sanbabada goor hore la ogaado haddaba qalliinka iyo daaweynta shucaaca labaduba waa daaweyn heerar aad u sarreeya waxtar leh .

Ujeedada rugta caafimaadka

Mudada aad nala joogto rugta caafimaadka, waxa aanu rabnaa in aanu ku siino macluumaad waadex ah haddana fudud oo la fahmi karo oo ku saabsan qiyaarooyinka daawayntaada si aan wada jir ahaan ku go'aansanno daawaynta kugu habboon.

Annagu ma aha in aan kuu sheegno daawaynta aad lahaan kartid ama aanad lahaan karin, laakiin taa beddelkeeda waxaan kaa taageereynaa si aad u gaarto go'aanka saxda ah ee adiga kugu habboon. Si taas lagaaga caawiyo, waxaa jiri kara macluumaad badan oo laga wada hadli karo. Waxaad kale la kulmi kartaa dhakhaatiir iyo kalkaaliyeyaal kala duwan.

Natiijooyinka dhammaan baaritaanada kala duwanaa ee aad hore u soo martay, oo ay la socdaan baadhitaano dheeraad ah oo la dhammaystiri doono maalinta booqashadaada ee rugta, waxaa dib u eegi doonaan kooxdayada oo haddana kaala hadli doona.

Fadlan keenso qof ka mid ah qoyskaaga ah ama saaxiib si ay maalintaas ku taageeraan, laba dhegood oo dheeri ah had iyo jeer waa wax waxtar leh!

Kooxdayada

Inta lagu jiro maalinta waxaa laga yaabaa inaad la kulanto qaar ka mid ah xubnaha soo socda ee kooxdayada:

- **Takhtarka qalliinka dhuunta:** khabiir ku takhasusay qaliinka si kansarka sanbabada looga saaro
- **Takhtarka ku takhasusay daaweynta Kansarka:**khabiir ku taqasusay daawaynta kansarka sanbabada oo leh shucaac
- **Takhtarka suuxinta:**khabiir ku takhasusay daryeelka bukaanka xiliga qalliin ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib
- **Takhtarka kansarka sanbabada**: khabiir ku takhasusay dhammaan dhinacyada ogaanshaha iyo daawaynta kansarka sanbabada
- **Kalkaaliyaha thoracic ama Macmillan:** kal-kaaliyaal takhasus leh oo taageera bukaannada qaba kansarka
- **Koocda CURE:** koox takhasus leh oo caawinaya bukaanada sigaarka cabba inay joojiyaan
- **Prehab4cancer team**: Takhaatiirta xirfadleyaal ee ka caawiya bukaanada u diyaargarowga daaweynta kansarka
- **Oncogeriatrician:** Takhtar takhasus leh oo taageera bukaannada qaba kansarka si loo hagaajiyo dhammaan dhinacyada caafimaadkooda
- **Kooxda 'Being You' ee ka socota St Ann's Hospice:** koox ku siinaya qalab caafimaad oo kala duwan oo diyaar u ah inay ku taageeraan

Waxa ka dhaca rugta caafimaadka

Saacada bilowda ee Rugta: 8 subaxnimo

Fadlan ku imaaw waqtigeeda ee 8da subaxnimo maadaama saacadda ugu horreysa ee maalintaadu ay noqon doonto mid mashquul aah. Waxaad filan kartaa inaad nala joogto rugta caafimaadka dhowr saacadood (badanaa subaxda oo dhan, mararka qaarkoodna ka sii dheer haddii loo baahdo).

Markaad timaado, shaqaalaha kalkaalinta ayaa kula kulmi doona imaatinkaada waxayna dhamaystiri doonaan dhammaan baaritaanada iyo qiimaynta muhiimka ah ee lagama maarmaanka ah. **Fadlan xidho dhar raaxo leh, dabacsan iyo kabahaaga maalinlaha ah**.

Marka xigta, takhaatiirtaada iyo kalkaaliyayaashaada ayaa kula kulmi doonaan si ay dib ugu eegaan kaagana hadlaan baaritaanada aad ku sameysay isbitaalka deegaankaaga iyo markii ugu horeysay ee aad timid rugta caafimaadka.

Inta u dhaxaysa, waxaad heli doontaa fursad aad ku daawato fiidiyow macluumaad oo kala duwan oo ku saabsan daawaynta kansarka sanbabada iyo sida loogu diyaargaroobo daawayntan. Waxa kale oo aad la kulmi doontaa koox kasta oo khuseeya baahiyahaaga, sida khabiirka kooxda joojinta sigaarka ama daaweeyaha dhamaystiran ee St Ann's Hospice.

Ugu dambayntii, waxaad heli doontaa fursad aad kula kulanto dhakhaatiirta kala duwan, inaad kala hadasho fursadahaaga daawaynta waxaana rajaynaynaa inaad dareento in taageer lagu siiyey si aad go'aan uga gaartid daawayntaada.

Waxaa jira macluumaad badan oo la qaadan karo waxaana ku taageeri doona khabiirkayaga si aad u weydiiso su'aalo kasta ee maalinta oo dhan.

Waxa aad maalintaasi keeni lahayd (liiska hubinta)

- Qaraabo ama saaxiib

- Dhammaan daawooyinkaaga hadda (Dhammaan kaniiniyada, daawooyinka, irbadaha iyo daawada neefsashada)
- Muraayadaha indhaha, qalabka gargaarka maqalka/qalabka socodka sida loo baahan yahay.
- Lambarada xiriirka shakhsi ahaaneed iyo ciwaannada iimaylka
- Qalin iyo warqad aad ku qorato macluumaadka & su'aalaha
- Waxaan ku siin doonaa shaah/kafee, buskut iyo sandwij, laakiin haddii aad leedahay wax cunto ah oo gaar ah, fadlan hore u soo qaado cabitaan / cunto fudud sida loo baahan yahay.

Xubin ka mid ah kooxda kalkaalisada ayaa ku soo wici doona maalintaas ka hor si aad u hesho macluumaadkan mar kale kana jawaabo su'aalaha aad qabto ee ku saabsan booqashadaada soo socota ee Rugta Kansarka Sambabka ee One-Stop.

Sida loo helo rugta caafimaadka

Rugta caafimaadku waxay ku taal:

The Neil Cliffe Centre, Entrance 12, Wythenshawe Hospital, Southmoor Road, Manchester, M23 9LT

Halkee baan baabuurkeyga dhigan karaa?

Xarunta Neil Cliffe waxay ku taalaa dhinaca dambe ee Isbitaalka Wythenshawe, oo u dhow waaxda dhalmada (Maternity Unit). Waxaa jira meel baabuurta la dhigto ee dadweynaha, oo laga galo waddada Floats Roads, ee ka soo hor jeedda waaxda dhalmada. Halkaasi, u lugeey geeska midig ee waaxda dhalmada oo waxaad arki doontaa albaabka gelitaanka ee Neil Cliffe Center.

Khariidadda Isbitaalka Wythenshawe:



Kani waa sawirka xarunta Neil Cliffe oo ah rugta caafimaadka laga qabto:

Haddii aad u baahan tahay baabuur si aad u booqato rugtayada caafimaadka, arintan waanu kuu diyaarin doonnaa. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto arrintan, fadlan nagala

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid fadlan nagala soo xiriir: Telefoon: Iimayl:

soo xiriir faahfaahinta hoose.

Waxaan rajeyneynaa inaan kula kulmo.

Rugta Kansarka Sambabada ee One-Stop
The One-Stop Lung Cancer Clinic Team

Fadlan isticmaal booska hoostan si aad ugu qorato wixii su'aalo ah ee aad u hayso ee dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka ka hor ama isla maalintaasi: